

Wargeyska Mountain View

Nofembar 30, 2016

Jimco, Diseembar 2.....Guddiga Bulshada Dugsiga, Maktabka @ 3:30

Talaado, Diseembar 6.....Shirka Waalidiinta iyo Macmacaanka, CLC @ 8:15

Fariinta Agaasimaha

Waxaan rajeynaa in aad dhamaan ka hesheen waqtiga aad la qaadateen qoysaskiina xilligaan fasaxa Mahad Celinta (Thanksgiving). Hiddo kasta ama diin kasta aan haysano, waxaa wanaagsan in an is xasuusino in aan ku mahdino waxyaabaha aan haysano iyo dadka aan la nool nahay. Maanta waxaan rabaa in aan xoogga saaro mahad celinta.

Waxaan u mahad celinaa bulshada wanaagsan aan la shaqeeyo. Ardaydena iyo qoysaskooda waxay dhab ahaan daneyaan waxbarashada iyo in ay sameyaan waxa wanaagsan. Waxaan ku mahdinaa daryeelkooda. Waxaan u mahad celinaa kulliyadana iyo shaqaalaha. Waxay sameyaan wax kasta ay yaqaanaan si ay u sugaan in ardayda waxbartaan iyo in ay gaaraan heer sare. Waxaan ku mahdina in aan ka shaqeeyo dugsiga dagmada wanaagsan halkaas aan dhamaan ka heli karno taageero si aan maalin kasta fasaladena iyo dugsiyadana u gaarsiino heer sare iyo sinaan.

Waad ku mahadsan tahini dhamaan waxa aad samaysaan si aad Mountain View uga dhigtaan meel sare oo wax laga barto iyo laga shaqeeyo.

Mahadsanid Karina

Karina Gutierrez-Bowles waxay ka soo shaqeysay dugsigena, waxay ahayd iskuduwaha PEP ee dugsigena. Waxay ruqseysatay dhawaanahaan si ay xoogga u saarto cunugeeda cusub. Waxaan rabnaa in aan Miss Karina uga mahad celino dhamaan inta ay u qabatay dugsigena. Waxay maamuli jirtay naadigena Marathon Club, Soccer Club, kooxda jimicsiga waalidiinta, iyo waxay kaalmo siisay fasalada Jimicsiga. Waxaan uga mahad celineynaa in ay Mountain View ka dhigtay meel caafimaad qabta. Waxaan dareemi doonaa maqnaashadeeda, hase ahaatee waxaan ogsoonahay in ay muhiim u tahay iyada in ay waqti la qaadato cunugeeda yar. Mahadsanid, Karina!

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Oktoobar 6, marka ay tahay 8:15. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Kaararka Warbixinta

Dhamaadka trimestarka kowaad waa Jimco, Nofeembar 18. Shahaadooyinka waxaa la soo diri doonaa todobaadkaan. Fadlan cunugaada la fiiri kaarka warbixinta, kaddibna kala hadal waxa uu ku fiican yahay, iyo waxa uu hagaajin karo. Fadlan fiiro gaar ah u yeelo qeybta imaashada. Waxaan arkay in yar oo qabta maqnaasho iyo daahid badan. In la maqnaado ama la soo daaho waxay adkeysaa hawsha waxbarashada. Fadlan samayso qorshe si aad u habsatid in cunugaada yimaado dugsiga maalin kasta iyo waqtiga loo qabtay.